



Fursada Tallaalka COVID-19 Ardayda Da'doodu Tahay 16 Sanno iyo Ka Weyn

Abril 30, 2021

Ardayda Dugsiga iyo Qoysaskooda,

Ardayda da'doodu tahay 16 sanno iyo ka weyn ee Dugsiyada Degmada, oo ay ka mid yihiin Dugsiyada Dadweynaha Portland, waxaa loo hayaa fursad cusub oo ay ku helayaan **tallaalada COVID-19 oo bilaa lacag ah, laga bilaabo todobaadka soo socda iyada oo goobta laga helayo ay tahay Oregon Convention Center**. Haddii ardaygaaga da'diisu tahay 16 sanno ama ka weyn yahay walina aan la tallaalin, waxaan rajeyneynaa inaad fursadan ka faa'iideydsan doontaan, taasi oo **sidoo kale xubnaha qoyska ka mid ahna ay tallaalkaasi la siinayo**.

Waxaan idinla wadaagi doonaan maclumaad dheeraad ah, oo ay ka mid yihiin sida loo sameysto ballamaha laga bilaabo todobaadka soo socda, maalinta Isniinta. Fadlan waxaad la socotaa email aan kuu soo diri doono.

Waxaan idiin rajeyneynaa nabadgleyo iyo todobaad xasiloon.